

Somaliska

### **Bogga 1aad**

Macluumaadka waalidka – is daryeelida

#### **Ilmaha u baahan in laga caawiyo daawooyinka ama qalabka caawinaada ee dhigta dugsiga**

Ilmahaaga maloo qoray daawo? Dhaqtarka ma xukmiyay in la qaato waqtiga ilmaha uu joogo xannaanada/dugsiga ama dugsiga xilli faraaqada ilmahaagana ma u baahan yahay in laga caawiyo? Markaas waa in daryeelka caafimaadka uu qoraa go'aan ah isdaryeelid iskaaga ah markaas ka dibna waa inaa keentaa dugsiga.

Waxaa jira foom u gaar ah (go'aanka is daryeelida shaqsiga) kaas oo daryeelka caafimaadka uu haysto ayagaana kuu buuxinaaya.

Maamulaha dugsiga ilmahaaga dhigto waxaa uu mas'uul ka yahay in ilmahaaga helo caawinaada saxda ah ee uu u baahan yahay.

### **Bogga 2aad**

#### **Wax ka qabadka daryeelka caafimaadka oo heer sare ah**

Ilmahaaga ma u baahan yahay daryeel caafimaad oo horumarsan iyo qalabka gargaarka inta lagu jiro xilliga uu xannaanada/dugsiga/dugsiga xilli faraaqada dhiganaayo? Mise maku filna macluumaadka ku qoran go'aanka is daryeelida? markaas daryeelka caafimaadka ayaa qaadaya mas'uuliyadda qorsheynta ilmahaaga.

Waa daryeelka caafimaadka ama dugsiga kan go'aaminaaya waxa ay yihiin wax qabadyada daryeelka caafimaadka heerka sare ah.

#### **Su'aalo maka qabtaa is daryeelida ilmahaaga?**

Waxaad la xiriirtaa xarunta daryeelka caafimaadka, waaxda daryeelka ama qaabilaada uu ilmaha xiriirka la leeyahay ayagaa ku caawinaaya.

### **Bogga 3aad**

#### **Maxaa adiga waalid ahaan kula gudboon inaa sameysid?**

Haddii dhaqtarka uu qiimeeyo in ilmahaaga uu u baahan yahay daawo, oo uu u baahan yahay in la caawiyo inta lagu jiro xilliga uu ilmaha dugsiga joogo markaa waalidka ayaa mas'uul ka ah in ay:

- keenaan foomka iyo
- daawooyinka oo ku jira baakooyinka asalka ah.

Markaa xannaanada/dugsiga/dugsiga xilli faraaqada ayaa ilmahaaga u siin kara daawada sida uu dhaqtarka ugu soo qoro inuu u qaato.

#### **Mas'uuliyadaada ka waalid ahaan**

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaa la xiriirto daryeelka caafimaadka haddii isbedel uu dhaco dugsigana waa inaa la soo socodsiiisaa haddii loo baahdo waxyaabo cusub.

#### **Daawooyinka intooda badan waxaa la qaataa xilliyada dugsiga ka hor ama ka dib iyo ka hor inta aan la seexan**

Xaaladaha qaarkood waxaa loo baahan yahay in daawooyinka la qaato maalinta bartankeeda. Kala hadal dhaqtarka.